Parent Aware



Helitaanka Daryeelka Carruurta:

Hagaha Qoysaska

DEPARTMENT OF CHILDREN, YOUTH, AND FAMILIES

Hindisahan waxaa suurtageliyay (ama qayb ahaan maalgeliyay) deeq ka timid Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska ee Minnesota.

MA U BAAHANTAY CAAWIMO? Booqo PARENTAWARE.ORG

Helitaanka Daryeelka Carruurta: Hagaha Qoysaska

Parent Aware waxay bixisaa ilo bilaash ah si ay kaaga caawiso inaad hesho daryeelka carruurta iyo barnaamijyada waxbarashada hore ee ilmahaagu u baahan yahay si uu u kobco.

Helitaanka daryeelka carruurta waxay noqon kartaa mid adag. Waxaa laga yaabaa inaad dareento walaac ama culeys. Isla mar ahaantaana, waxay noqon kartaa wax xiiso leh inaad gasho marxalad cusub oo koritaanka ilmahaaga ah oo aad hesho barnaamij ku habboon qoyskaaga. Hagahan wuxuu bixiyaa tallaabooyin kaa caawinaya inaad doorato barnaamijka daryeelka carruurta, oo ay ku jiraan su'aalaha la isweydiiyo iyo waxyaabaha la raadinayo marka la booqanayo barnaamijyada. Waxa kale oo uu leeyahay xiriiriyeyaal ilo kale oo waxtar leh.

Isticmaalka qalabkayaga **raadinta ee bilaashka ah ee onlaynka ah ee ParentAware.org** waa meel wanaagsan oo aad ka bilaabi karto safarkaaga raadinta daryeelka carruurta. Iyada oo la helayo maalgelin iyo taageero ka timid Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska ee Minnesota, aaladdayada raadinta waxay bixisaa macluumaadka ugu saxsan ee ku saabsan dhammaan barnaamijyada daryeelka carruurta ee shatiga leh ee gobolka.

Waxaad sidoo kale heli kartaa **taageero shakhsi ahaaneed adigoo wacaya 888-291-9811.** Shaqaalahayaga aaminka ah waxay leeyihiin sannado khibrada daryeelka carruurta ah. Waxay ka jawaabi karaan su'aalahaaga, waxay kaa caawin karaan sidii aad usoo koobi lahayd raadintaada, waxayna kugu hagi karaan ilo kale oo qiimo leh.

Hagahan waxaa laga heli karaa onlayn ahaan Ingiriisi, Isbaanish, Soomaali, iyo Hmong; nuqulada daabacan waxaa lagu heli karaa Ingiriisi iyo Isbaanish.

Ku saabsan Qiimeynta Xiddigaha ee Parent Aware

Qoysasku waxay isticmaalaan Qiimeynta Xiddigta ee Parent Aware si ay u helaan barnaamijyo ka caawiya carruurta inay kobcaan.

Barnaamijyada daryeelka carruurta ee leh **Qiimeynta Hal Xiddigle** waxay shati ka haystaan degmadooda ama gobolkooda. Shati siinta macnaheedu waa in dary-eelayaashu ay heleen tababar, tirada carruurta ee guriga ama fasalka aysan ka badnayn heerarka gobolka, iyo in la buuxiyay qawaaniinta caafimaadka iyo bad-baadada. Barnaamijyada shatiga haysta ayaa sidoo kale si joogto ah loo kormeeraa waxayna helaan ganaaxyo ama waayi karaan shatigooda haddii heerarka aan la ilaalin. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxa shatigu ka dhigan yahay wax-aa laga heli karaa mareegta Parent Aware. ParentAware.org/families/child-care-li-censing. *Barnaamijyada shatiga haysta waxay fursad u haystaan inay ka baxaan helita-anka Qiimeynta Hal Xiddigle.*

Marka barnaamijku ka qaybqaato habka Qiimeynta Xiddigta ee Parent Aware si uu u kasbado **Qiimeyn Laba-, Saddex-, ama Afar-Xiddigle ah,** waxay si ikhtiyaari ah u qaataan tababar dheeraad ah waxayna adeegsadaan habab ka sarreeya kana baxsan shuruudaha shatiga. Heer kasta oo qiimeyn ah wuxuu ku dhisan yahay kan ka horreeya, taasoo ka caawinaysa qoysaska inay si fudud u aqoonsadaan hababka tayada ee uu barnaamijku isticmaalayo.

Wax badan ka baro Qiimeynta Xiddigta ee Parent Aware halkan ParentAware.org/about-star-ratings.





Noocyada Daryeelka iyo Waxbarashada

Waxaad yareyn kartaa raadintaada khadka tooska ah adigoo isticmaalaya qaybahan: Xarumaha iyo Dugsiyada Xannaanada, Daryeelka Carruurta ee Qoyska, iyo Head Start.

Xarumaha iyo Dugsiyada Xanaanada

Barnaamijyadan waxaa shati siisa oo kormeera Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska ee Minnesota (DCYF) ama hay'ad shati siisa oo Qabiileed. Waxay bixiyaan daryeel iyo waxbarasho carruurta oo loo habeeyay kooxo da' ku salaysan, waqti buuxa ama waqti dhiman.

Daryeelka Ilmaha ee Qoyska

Barnaamijyada daryeelka carruurta ee qoyska waxay shati ka haystaan DCYF waxaana kormeera degmada ama hay'adda shatiga ee Qabiilka. Bixiyeyaasha daryeelka ilmaha ee qoyska ayaa laga yaabaa inay guryahooda ku daryeelaan dhallaanka, socod-baradka, carruurta xanaanada, iyo carruurta da'da dugsiga ku jirta.

Head Start iyo Early Head Start

Barnaamijyada Head Start waxay taageeraan koritaanka carruurta laga bilaabo dhalashada ilaa da'da shanta sano iyada oo loo marayo adeegyo taageera barashada iyo koboca hore, caafimaadka, iyo fayo-qabka qoyska. Shaqaalaha Head Start waxay si firfircoon ula shaqeeyaan waalidiinta, iyagoo aqoonsan in ka-qaybgalka qoyska inta uu socdo barnaamijku uu muhiim u yahay gaarista natiijooyinka wanaagsan ee carruurta.

Qoyska, Saaxiibada, iyo Deriska

Carruur badan oo ku nool Minnesota waxaa daryeela qoyska, asxaabta, iyo deriska. Tani waxay ka dhigan tahay in daryeeluhu uu daryeelo oo keliya carruurta qaraabada ah ama carruurta ka socota ugu badnaan hal qoys oo aan qaraabo ahayn. Daryeelka noocan ah waa doorasho joogto ah oo loogu talagalay waalidiinta leh dhallaanka iyo socod-baradka, iyo sidoo kale waalidiinta ka soo jeeda bulshooyinka dhaqamada iyo qowmiyadaha kala duwan iyo kuwa shaqeeya saacadaha aan caadiga ahayn. Barnaamijyadan ma laha shati ama shahaado mana ka muuqdaan natiijooyinka raadinta Parent Aware, laakiin waxaa jira ilo la heli karo si loo caawiyo daryeelayaashan InclusiveChildCare.org/parents-grandparents-and-caregivers.



Bixinta Lacagta Xanaanada Carruurta

Caawimada maaliyadeed iyo qorshayaasha dhimista canshuurta ayaa kaa caawin kara bixinta kharashka daryeelka carruurta.

Kharashka daryeelka carruurta wuxuu ku xiran yahay da'da ilmahaaga, nooca barnaamijka, iyo goobta barnaamijka. Barnaamijyada kaalmada maaliyadeed ayaa kaa caawin kara inaad bixiso kharashka daryeelka carruurta ee Minnesota, dhowr dhibcood oo canshuur iyo ka jarista canshuurta dakhligaaguna waxay kaa caawin karaan inaad ka dhigto daryeelka mid aad awoodi karto. Kuwaani waxaa ka mid ah:

- **Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Carruurta (CCAP)**
- **Deeqda Waxbarashada Yaraanta**
- **Dhibcaha iyo ka jarista cashuurtaada dakhliga**

Waxaad wici kartaa 888.291.9811 si lagaaga caawiyo helitaanka kaalmada dhaqaale, ama waxaad:

- Isticmaal qalabka bilaashka ah ee baarista caawimada maaliyadeed ee **Bridge to Benefits** si aad u aragto haddii aad u qalmi karto caawimo. Tag bridgetobenefits.org.
- U isticmaal bogga **Bixinta Lacagta Xanaanada** hage ahaan gargaarka maaliyadeed. Tag ParentAware.org/families/paying-for-care.
- Raadi caawimaad bilaash ah oo ku saabsan xareynta canshuur celinta. Tag bogga revenue.state.mn.us/free-tax-preparation-help.

Kheyraadka Qoysaska leh Baahiyo Daryeel oo Gaar ah

Waalidiinta carruurta leh baahiyaha gaarka ah, qoysaska LGBTQ, iyo qoysaska raadinaya daryeel dhaqan ahaan gaar ah ayaa laga yaabaa inay qabaan walaacyo dheeraad ah oo ku saabsan helitaanka daryeelka carruurta. Ilahan ayaa caawin kara.

- Qoysaska leh carruur leh baahiyo gaar ah waxay isticmaali karaan hagahayaga si ay u helaan adeegyo iyo daryeel carruureed oo ka caawiya carruurtooda inay koraan oo horumaraan. Tag ParentAware.org/children-with-special-needs.
- Qoysaska LGBTQ laga yaabaa inay qabaan walaac dheeraad ah iyo tixgelinta si loo helo daryeelka ilmaha oo xasaasi ah ixtiraamna leh. Tag ParentAware.org/help-for-lgbtq-families-seeking-child-care.
- Kheyraadka Qabiilka ee Daryeelka Carruurnimada Hore ee Minnesota (MNTRECC) waxay siisaa daryeelka yaraanta iyo ilaha waxbarashada carruuta Hindida Mareykanka ah iyo qoysaskooda. Tag llboearlychildhood.com/1-home/programs/mn-trecc.
- Waalidiinta raadinaya barnaamijyo laba luuqadood ku baxo ama ku shaqeeya luqado aan Ingiriisi ahayn waxay ka heli karaan macluumaadka luqadda liiska natiijada raadinta Parent Aware ee barnaamijka.



Liiska hubinta ee doorashada xarunta daryeelka carruurta

Raadinta Barnaamij ku habboon Ilmahaaga

1. Aqoonso barnaamijyada suurtagalka ah
2. Gaaritaan
3. Hubi tixraacyada iyo diiwaannada
4. Booqo barnaamijyada
5. Samee doorashadaada
6. Ku lug yeelo

1 Aqoonso barnaamijyada suurtagalka ah

Isticmaal qalabkayaga raadinta ee bilaashka ah ee onlaynka ah ee ParentAware.org si aad u aqoonsato barnaamijyada u dhow gurigaaga ama goobtaada shaqada.

- Ku hagaaji shuruudaha goobta, saacadaha shaqada, da'da loo adeego, deegaanka, iyo luqadaha lagu hadlo si aad u hesho natiijooyin gaar ah. Waxaad sidoo kale arki kartaa haddii barnaamijku aqbalo barnaamijka Child Care Assistance ama Early Learning Scholarships.
- Barnaamijyada waxaa lagu dhiirigelinayaa inay wadaagaan boosaska banaan ee hadda jira iyo qiimayaasha; macluumaadkaas waxaa lagu qoray astaanta barnaamijka, haddii la heli karo.

Khabiiradayada daryeelka carruurta ee saaxiibtinimada leh ayaa diyaar u ah inay ku caawiyaan. Wac 888.291.9811 ama isticmaal aaladda wada sheekaysiga ee websaydhka.

2 Gaaritaan

Ka dib markaad aqoonsato barnaamijyada suurtagalka ah, la xiriir si aad u hubiso boosaska banaan oo aad u go'aamiso haddii kharashka iyo jadwalku ay dabooli doonaan baahiyahaaga. Tani waa fursad wanaagsan oo aad ku soo bandhigi karto naftaada oo aad su'aalo ku weydiin karto. Waxaad sidoo kale laga yaabaa inaad rabto inaad eegto bogga internetka ee barnaamijka iyo wararka warbaahinta bulshada.

3 Hubi tixraacyada iyo diiwaannada

- Ka codso tixraacyo qoysaska hadda isticmaala barnaamijka ama dhawaan isticmaalay.
- Isticmaal raadinta shatiga gobolka (licensinglookup.dhs.state.mn.us) si aad u hubiso xaaladda shatiga barnaamijka oo aad u raadiso wixii xadgudubyo caafimaad iyo badbaado ah ama amarada sixitaanka.

Caawinta hanaankan ayaa la heli karaa adigoo wacaya 888.291.9811.

4 Booqo barnaamijyada

Bogagga soo socda ayaa kaa caawinaya inaad isbarbardhigto barnaamijyada daryeelka carruurta oo aad hesho kan ugu habboon ilmahaaga.

Booqo Barnaamijyada

XIRIIRADA. Maskaxda carruurtu waxay si fiican u horumartaa marka ay daryeel iyo xiriir joogto ah la leeyihiin daryeelayaasha.

Su'aalo: Muddo intee le'eg ayaad adiga (ama shaqaalahaagu) u shaqeynaysaan barnaamijka?

Sideed uga jawaabtaa habdhaqanka adag?

Waxa La Raadinayo: A Dadka waaweyn waa inay ahaadaan kuwo joogto ah, naxariis leh, oo dulqaad leh, isla markaana yaqaan waxa carruurtu jecel yihiin iyo waxa aysan jeclayn. Waa inay waqti ku qaataan la hadalka iyo dhageysiga ilmo kasta. Barayaasha carruurnimada hore waa inay si wanaagsan wax uga qabtaan habdhaqanka adag, halkii ay ku qaylin lahaayeen ama ciqaabi lahaayeen.

WAXBARASHO IYO KHIBRAD. Barayaasha carruurnimada hore ee leh waxbarasho iyo khibrad ayaa si fiican u fahma baahiyaha korriinka ee carruurta yaryar.

Su'aalo: Ma ii sheegi kartaa khibradaada (ama tan shaqaalahaaga) ee la shaqeynta carruurta yaryar?

Waa maxay tababarka gaarka ah ee aad adigu/ay iyagu leeyihiin?

Waxa La Raadinayo: Bixiyeyaasha daryeelka carruurta ee ruqsadda haysta waxaa looga baahan yahay inay dhammaystiraan tababarka sannadlaha ah. Barnaamijyada leh Qiimeynta Laba-, Saddex-, ama Afar-Xiddigle ee Parent Aware, iyo kuwa haysta aqoonsiyada qaranka, waxay qaataan tababar dheeraad ah sannad kasta. Barayaasha carruurnimada hore waxay sidoo kale lahaan karaan shahaadooyin ama aqoonsiyo la xiriira Waxbarashada Carruurnimada Hore ama qeybaha la xiriira.

CABBIRKA KOOXDA. Carruurta lagu daryeelo qaab kooxo yaryar ah ayaa heli kara dareenka ay uga baahan yihiin dadka waaweyn.

Su'aalo: Immisa carruur ah ayaa ka diiwaangashan barnaamijkaaga?

Maxay yihiin siyaasadahaaga kormeerka ee hawlaha gudaha iyo dibadaba?

Waxa La Raadinayo: Carruurta waa in had iyo jeer la kormeero. Gobolka Minnesota wuxuu xaddidaa cabbirka kooxahaee daryeelka carruurta ee shatiga leh. Tirada carruurta uu qofku si sharci ah u daryeeli karo waxay ku xiran tahay shatigooda.

CAAFIMAADKA IYO BADBAADADA. Jawi aamin ah oo nadiif ah ayaa taageera caafimaadka ilmaha. Dhammaan barnaamijyada shatiga haysta waxaa looga baahan yahay inay buuxiyaan heerarka adag ee caafimaadka iyo badbaadada.

Su'aalo: Dhammaan barayaashii hore (ama dhammaan dadka deggan guriga daryeelka carruurta ee qoyska) ma lagu sameeyay baaritaanka taariikhda dembiyada?

Ma jiraa qorshe loogu talagalay cimilada xun, dabka, daadadka, ama xaaladaha kale ee degdegga ah?

Ma raacdaa talooyinka hurdada badbaadada leh ee dhallaanka?

Waxa La Raadinayo: Goobta barnaamijku waa inay ahaataa mid nadiif ah oo soo jiidasho leh, oo ay ku yaalaan alaabta lagu ciyaaro, qalabka, iyo buugaagta oo si fudud loo heli karo oo xaaladdooduna wanaagsan tahay. Waa inay jirtaa meel loogu talagalay ciyaar firfircoon, sidoo kalena qalabka ciyaarta bannaanka waa inuu ku jiraa xaalad wanaagsan oo uu ku yaallo dusha jilicsan, sida ciid, mulch, ama gogosha caagga ah.

Barnaamijka 1	Barnaamijka 2	Barnaamijka 3

sii wada

WAXQABAD QORSHEYSAN. Haysashada waxqabadyo qorsheysan iyo jadwal maalinle ah waxay ka caawisaa carruurta inay dareemaan ammaan waxayna taageertaa koritaankooda.

Su'aalo: Sidee ayay u egtahay maalinta caadiga ah?

Ma qaadataan safarro waxbarasho ama ma sameysaan waxqabadyo kobcin ah?

Intee jeer ayaa ilmaheyga loo akhriyaa?

Waxa La Raadinayo: Carruurtu waa inay helaan waxqabadyo kala duwan, oo ay ku jiraan wakhtiga sheekada, muusigga, ciyaaraha, ciyaarta dhar-xirashada, alaabta lagu ciyaaro ee wax lagu dhiso, iyo wakhtiga bannaanka. Barnaamijyada qaarkood waxay isticmaalaan manhaj rasmi ah; kuwa kale waxaa laga yaabaa inaysan isticmaalin, laakiin weli waxay taageeraan koritaanka iyo koboca carruurta.

LA SOCO HORUMARKA. Qiimeynta joogtada ah ee korriinka ilmaha ayaa ka caawin karta in la ogaado meelaha ay ku fiican yihiin iyo caqabadaha.

Su'aalo: Sidee loo kormeeraa korriinka ilmahayga?

Ma isticmaashaan indho-indheynta si aad u qorsheysaan ama u beddeshaan waxqabadyada ilmo kasta?

Waxa La Raadinayo: Barnaamijku wuxuu isticmaali karaa aalad qiimeyn rasmi ah si uu u cabbiro koboca, ama tani waxay u dhici kartaa si aan rasmi ahayn. Carruurta waa in la siiyaa waxqabadyo kala duwan ama wax ka beddel ku saleysan xirfadaha ay u baahan yihiin in laga caawiyo waana in loo oggolaadaa inay raacaan waxyaabaha ay xiiseeyaan.

IXTIRAAM DHAMAAN QOYSASKA. Barnaamijyadu waa inay wax ka qabtaan eexda jinsiyadeed iyo tan dhaqan, isla markaana ay taageeraan dhaqamada dhammaan qoysaska.

Su'aalo: Ma arki doonaa ilmahaygu luqaddiisa iyo dhaqankiisa oo ka muuqda agabka barnaamijka, alaabta ciyaarta, iyo buugaagta?

A Ma jiraan agabyo la heli karo oo ka caawiya carruurta inay bartaan dadka ka yimaada dhaqammo kala duwan?

Waxa La Raadinayo: Barayaasha carruurnimada hore waa inay ixtiraamaan asalka gaarka ah ee ilmo kasta, oo ay ku jiraan isirkooda, diintooda, qowmiyaddooda, iyo jinsigooda. Waxqabadyada waxka bara waxyaabaha ay iskaga midka yihiin iyo waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin ee lagusoo bandhigo qaabab xaqiiq ah, wanaagsan ayaa carruurta ka caawiya barashada qiimeynta iyo ixtiraamka naftooda iyo dadka kale.

ISGAARSIIN. Waaliddiinta iyo barbaariyayaasha yaraanta waa inay maalin walba carruurta weydiiyaan xaalkooda. Carruurtu si joogto ah ayay u koraan isuna beddelaan, sidaa darteed wadaagida macluumaadku waa muhiim.

Su'aalo: Sideed ula wadaagtaa macluumaadka qoysaska?

Waxa La Raadinayo: Sabuuradaha, qoraallada, isgaarsiinta elektaroonigga ah, kamaradaha muuqaalka, iyo wada-hadalada dhamaadka maalin kasta ayaa dhammaantood ah siyaabo uu barnaamijku kugu siin karo wixii cusub ee ku saabsan xaaladda ilmahaaga.

Barnaamijka 1	Barnaamijka 2	Barnaamijka 3



5 Samee doorashadaada

Xaqiiji taariikhda aad bilaabayso barnaamijka aad dooratay oo buuxi wixii waraaqo ah ee lagaa codsado. Barnaamijyada badankoodu waxay kaa doonayaan inaad saxiixdo foomka diiwaangelinta ama qandaraaska, dib u eegto siyaasadaha, oo aad bixiso deebaaji si aad u haysato booskaaga.

6 Ku lug yeelo

Adiga ayaa ah qofka ugu fiican ee go'aamin kara in barnaamijku u shaqeynayo ilmahaaga iyo in kale. Markay carruurtu koraan, baahiyahooduna way isbeddelaan. Barnaamijyadu sidoo kale way isbeddali karaan waqti kadib. Taasi waa sababta ay muhiim u tahay inaad si joogto ah dib ugu qiimeyso doorashadaada daryeel. Waa kuwaan qaar kamid ah qaabab aad uga qaybqaadato ulana socoto:

Samee booqashooyin lama filaan ah

Barnaamijyadu waa inay soo dhaweeyaan booqashooyinka waalidiinta wakhti kasta, laakiin xasuuso in waqtiyada qaar ee maalinta ay aad u mashquul badan yihiin.

Qaado waqtigaaga

Markaad keenayso ama qaadayso ilmahaaga, tixgeli inaad xoogaa dheer joogto.

Beddel waqtiyada

In ilmahaaga laga soo qaado isla wakhtiga maalin kasta waa hab fiican oo lagu dhiso jadwal joogto ah. Si kastaba ha noqotee, beddelida waqtiyada qaadida marmarka qaarkood waxay kuu oggolaaneysaa inaad arragto dhinacyo kala duwan oo maalinta ilmahaaga ah.

Mutadawac

Caawinta dhacdooyinka khaaska ah ama safarrada waxbasrasho waa hab xiiso leh oo lagula xiriiro ilmahaaga sidoo kale waa fursad aad kula macaamili kartid daryeelayaasha ilmahaaga.

Qabanqaabi shir

Qabanqaabinta kulan ama wadahadal taleefan waa fursad aad kaga hadli karto ilmahaaga, su'aalo ku weydiin karto, ama aad ku muujin karto walaacyada.

La kulan dad cusub

Lagu barto xirfadlayaasha daryeelka ilmaha, shaqaalaha, ama mutadawaciinta laga yaabo inay waqti la qaataan ilmahaaga.

Miyaad Dhibaato Ka Qabtaa Helitaanka Daryeel?

Helitaanka daryeel carruureed tayo sare leh, oo la awoodi karo oo waafaqsan miisaaniyaddaada iyo jadwalkaaga waxay noqon kartaa mid adag. Halkan waxa ku yaala talo bixino dhawr ah oo laga yaabo inay ku caawiyaan:

- La xiriir khabiiradeenna daryeelka carruurta si aad u hesho fikrado dheeraad ah. Waxay ku caawin karaan wakhti kasta oo ka mid ah hanaanka raadinta. Wac 888.291.9811.
- Eeg meelo kala duwan oo ka duwan kuwii aad markii hore ka fiirsatay. Waxaa jiri kara xulashooyin ku yaala waddo kale oo aad shaqada ku aaddo ama kuwa ka fog guriga.
- Isku qor liiska sugitaanka ee barnaamij kasta oo aad xiiseyneyso. Mararka qaar boosas ayaa si lama filaan ah usoo baxa.
- La hadal asxaabta, deriska, waalidiinta kale, iyo dadka aad wada shaqeysaan ee muddo dhawayd raadiyay daryeel carruur. Maxay sameeyeen?





ParentAware.org | 888.291.9811